



Xaaladaha degdeg ah ee Barafka da'a

Marka baraf da'o, waa in degganeyaashu ay baabuurta dhammaantood ka qaadaan dariiqyada magaalada Hopkins, goobaha baabuurta la dhigto, dariiqyo-xaq-u-laahanta iyo Wadiiqada janjeerta ee Baabuur Dhigashada ee Magaalada (Municipal Parking Ramp). Xaaladda degdeg ah ee barafka da'a waxaa lagu dhawaaqi karaa marka uu da'o baraf ilaa laba insh gaaraya. Waxaa meelaha baabuurta la dhigto la xaddidi doonaa ilaa inta waddooyinka la faaruqinayo qar ilaa qar, oo dhammaan barafka laga faaruqinayo goobaha baabuurta la dhigto iyo Wadiiqada janjeerta ee Baabuur Dhigashada ee Magaalada.

Qotada barafka da'a ayaa Hopkins la cabbiraa waxaana suurogal ah in aanay marwalba la mid noqon qotada barafka da'a ee laga sheego Madaarka Caalamiga ah ee Minneapolis-St. Paul. Xaaladaha degdeg ah ee barafka da'a ee Hopkins waxaa lagaga dhawaaqaa **Khadka Barafka da'a ee Hopkins (Hopkins Snow Line), 952-939-1399**. Waxaa weliba dhici karta in laga muujiyo Keybal Bulsheedka Hopkins (Hopkins Community Cable Channel) Jaanalka 16, Facebook iyo Hopkins Connections.

Xarumaha warbaahinta ee deegaanka, sida idaacadda raadiyaha ee WCCO-AM radio iyo midda telefishinka ee WCCO-TV ayaa laga wargeliyaa xaaladaha degdeg ah ee barafka da'a ee Hopkins; hase yeeshee, idaacadahaasi kuma ballan qaadayaan in warkaas laga sii dayn doono. Marka aanay hubin, waa in degganeyaashu ay marwalba wacaan Khadka Barafka.

Haddii xaaladda degdeg ah ee barafka da'a lagaga dhawaaqo Hopkins galabnimada ama xilliga fiidnimada, **waxay kooxaha Shaqooyinka Dawladda (Public Works) bilaabi karaan in ay dariiqyada faaruqiyaan saqda dhexe xoogaa ka dib, iyadoo marka ay saacaddu tahay 10ka habeenimo la bilaabayo xiridda iyo jiidista baabuurta**. Xaaladaha degdeg ah ee barafka da'a ee lagu dhawaaqo wixii ka dambeeya 10ka habeenimo waxay keeni karaan in hawlaha xiridda iyo jiidista baabuurta la bilaabo marka ay saacaddu tahay 8da subaxnimo maalinta ku xigta. Si ay uga badbaadaan in baabuurtooda la jiido, waa in degganeyaashu ay baabuurta ka qaadaan dariiqyada Magaalada iyo goobaha baabuurta la dhigto islamarka lagu dhawaaqo xaaladda degdeg ah ee barafka da'a.

Baabuur dhigashada Xaaladda degdeg ah ee Barafka da'a

Bartamaha Hopkins

- Xarunta baabuurta la dhigto ee Maetzold Field oo laga soo galo dariiqa 1st Street North
- Xarunta Magaalada 300 xoogaa dhanka waqooyi ka xigta beerta Downtown Park ee ku taalla dariiqa 9th Avenue South



Koonfurta Hopkins

- Dhanka bari ka xigta dariiqa 9th Avenue South iyo dhanka waqooyi ee dariiqa Westbrooke Way una dhexeysa dariiqa 9th Avenue South iyo Nine Mile Creek
- Dhinaca bariga shishe ee dariiqa 8th Street South una dhow beerta Valley Park



Waraaqda warbixineed ee Barafka da'a

Hagahaaga ku saabsan amarrada la xiriira barafka da'a iyo xaaladaha degdeg ah ee barafka da'a ee Hopkins

Khadka Barafka da'a ee Hopkins
952-939-1399



City of Hopkins


Magaalada Hopkins
Waaxda Shaqooyinka Dawladda

11100 Excelsior Boulevard
Hopkins, MN 55343

952-939-1382
952-939-1381 (Fakis)

www.hopkinsmn.com


La beddelay Sebtenbar 2017



City of Hopkins

Baaldiyada Qashinka iyo Dib u warshadaynta

Guridda qashinka iyo dib u warshadaynta ee Magaalada Hopkins waxaa loogu baahan yahay in **masaafu ugu yaraan 4 fiit ah laga banneeyo hareeraha weel qashin kasta**. Mararka qaar meel ayaa weelka qashinka barafka looga gooyaa, laakiin taasi ma suurtoogelinayso in la helo goob ku filan si gacanta mashiinka ah ee gaari xammuulku ay u gaarto. Inkastoo surinnada iyo dariiqyada baabuurta la dhigto ee aqalka hortii ay ciriiri noqon karaan sababtoo ah barafka ku urura, haddana waxaa ka sii muhiimsan in la dhawro bannaanka baaldi kaste ku hareersan.



Marsha Biyeediyada

Xilliga jiilaalka, ganacsatada iyo degganeyaasha Hopkins ayay u taallaa in ay barafka jilicsan iyo midka adag ka qaadaan marsha biyeediyada dadku maraan.

Xataa xoogaa baraf ah oo da'a (ka yar laba insh) ayaa khatar u keeni kara dadka socda marsha biyeediyada.

Xeerka Magaalada Hopkins ee 820.03 ayaa milkiilaha iyo/ama degganaha guri kasta oo leh marsha biyeedi dadku maraan u dhigaya in uu barafka jilicsan iyo midka adag halkaas kaga qaado 12 saacadood ka dib marka barafku da'o. Waxay taasi lagama maarmaan u tahay si loo hubiyo badbaadada dadka marsha biyeediyada maraya. Amarkaasi waa mid la hirgelin doono.

Haddii barafka jilicsan iyo midka adag lagu qaadi waayo muddo 24 saacadood ah, shaqaalaha Magaalada ayaa kaas halkaas ka qaadi doona waxaana adiga lagu soo diri doonaa biilka ku habboon. Ujrooyinka ama lacagaha la qaadayo waxaa dejiya Golaha Magaalada (City Council).

Si aad uga soo warbixiso marsha biyeedi u baahan in la nadiifyo, fadlan soo wac Khadka Barafka da'a ee Marsha biyeediga (Sidewalk Snow Line) ee ah 952-548-6315.



Sanduuqyada boostada


Sanduuqyada boostada ee waxyeello ku timaad inta barafka la gurayo Magaaladu ma beddeli doonto haddii si dhab ah loo caddeeyo mooyee in baabuurta barafka gura ee Magaaladu ay wax yeellada geysteen. Haddii Magaaladu ay qaladka leedahay, sanduuqa boostada waxaa lagu beddeli doonaa sanduuq tayadiisu u dhiganto.

Magaaladu weliba mas'uul kama aha sanduuqyada boostada ee ku dhacay culayska barafka ku ag urura waddooyinka waaweyn.



Telefoonkaaga gacanta ku hel ogeysiisyada ku saabsan xaaladda degdeg ah ee barafka da'a marka aad is qorto Code Red (Digniinta Ugu daran). Tag halkan www.hopkinsmn.com/fire/codered/ si aad telefoonkaaga gacanta ugu diiwaan geliso.

Gaarigaygii Mee? Doonashada Baabuur La Jiiday



Xarunta baabuurta lagu xannibo marka lagu jiiido xaaladda degdeg ah ee barafka da'a waxay ku taallaa cinwaanka ah 5100 Park Glen Road ee St Louis Park. Macaamiishu waxay baabuurkooda ka doonan karaan xarunta baabuurta lagu xannibo halkaas ayayna lacagta ka bixin karaan.

Haddii baabuurkaaga loo jiiday sabab aanan ku xirnay barafka da'a, soo wac lambarka 952-949-0200 si aad warbixin u hesho.

Baabuurta lagaga tago dariiqyada ama goobaha baabuurta la dhigto ee dadweynaha inta lagu jiro xaaladda degdeg ah ee barafka da'a waxaa laga yaabaa in ganaax la saaro oo la jiiido (Xeerka Magaalada Hopkins ee 1305.31, 1305.33). Haddii baabuurkaaga la jiiido, shirkadda Bobby & Steve's Auto World ka wac lambarka 952-406-8111 si aad u xaqiijiso halka baabuurkaaga la geeyey.

Si aad baabuur uga soo qaadato xarunta, waxaad u baahan doontaa afarta shay ee soo socda:

- caddaynta in aad adigu leedahay (xaqa milkiyadda ama kaarka diiwaangelinta hadda)
- caddaynta caymiska hadda/sharciiyaysan ee baabuurku leeyahay
- laysinka darawalka ama aqoonsiga sawir leh ee gobolku soo saaray (haddii milkiilaha baabuurku uusan haysanin laysinka darawalka waxuu u baahan doonaa in uu xarunta u soo kexeysto darawal sharciiyaysan si uu gaariga u kexeeyo)
- lacagbixinta (kaarka deynka ama lacag caddaan ah uun—Haddii aad doorato in aad lacag caddaan ah ku bixiso, waa in aad keento caddadka sax ah)



Lacagaha Jiidista ee Ugu yar

- Jiidista isla maalintaas lagu soo qaado **\$125**
- Ujrada hawl maamulka ee ka dib 12ka saacadood ee ugu **\$25**
- Ujrada maalintii ee kaydinta dheeraad ah ka dib 12ka saacadood ee ugu horreeya **\$35**